



**The Transitional Federal Government of the Somali Republic**  
**Office of the Prime Minister**

Ref: XRW/War-Saxaaafadeed.014/07/11

Date: 26 July 2011

**Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya oo booqday xerooyinka barakacayaasha  
Soomaaliyeed ee Muqdisho.**

(Muqdisho, Talaado, 26ka July 2011) Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Ali Gaas ayaa booqday xerooyinka barakacayaasha Soomaaliyeed ee magaalada Muqdisho. Ra'iisul Wasaaraha waxaa ku wehliyey booqashadiisa Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Cabdixakim Cige Guled iyo Guddoomiyaha Gobolka Banadir ahna Duqa magaalada Muqdisho Mudane Maxamud Axmed Nur Tarzan.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa booqday maanta xerooyinka Al-Adaala, Korson ee degmada Wadajir iyo UNICEF xarunteeda ee degmada Waaberi oo ay ku soo barakaceen dad kumanyaal ah.

Ra'iisul Wasaare Dr Cabdiweli ayaa yiri " Ujeedada booqashadeydu waxey aheyd si aan ugu kuurgalo xaaladda barakacayaasha iyo inaan indhaheyga ku soo arko sida ay u socdaan howlaha gurmadka ah ee gar-gaarka bani'aadanimo loogu fidinayo barakacayaasha. Xaaladda 3da xero ee aan soo booqday aad iyo aad bey u liidatay, mana jirin gar-gaar ama gurmad si joogta ah loo gaarsiiyey.

" Xaaladdan sidan laguma fiirsan karo, ee hay'adaha Qaramada Midoobey waa inay si deg-deg ah u soo gaaraan shacabkan ku tabaaleysan magaalada Muqdisho. Waa nasiib daro in hay'adahu ay diyaariyaan gar-gaarkii hase yeeshay aysan si dhaqsi leh ku gaarsiinin shacabkii u baahnaa.

"Xukuumadda waxaa ka go'an in arrimaha gar-gaarka bani'aadanimo mudnaan gaar ah la siiyo, si loo badbaadiyo shacabka soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa ay dhibaatadu heysato. Qaramada Midoobey waxey caddeeyeen in xaaladda maanta dalka ka taagan ay tahay mid macluul tii ugu darneyd ah. Xaaladda maanta jirtana waa tii ugu liidatay muddo 60 sano ah.

"Abaaraha hadda jira waxaa gaarsiiyey xaaladdan robabkii oo yaraaday, kooxaha ka soo horjeeda dowladda oo shacabka ka hor is-taagay gar-gaarkii la gaarsiin lahaa iyo dagaalada joogtada ah.

"Waxaan aad iyo aad ugu faraxsanahay sida ay dhammaan hay'adaha dastuuriga ah uga wada qeybqaateen gurmadka loo fidinayo barakacayaasha ku soo barakacay magaalada Muqdisho. Sidoo kale waxaan ku faraxsanahay inaan arko shacabka soomaaliyeed iyo hay'adaha gar-gaarka ee qeyb mug leh ka qaata gurmadka shacabka soomaaliyeed. Ha yeeshay xaaladdan macluusha ah waa mid aad u baaxad weyn oo nooga wada baahan inaan dadaalkeena sii kordhino, oo weliba beesha caalamka ah ay gurmad deg-deg ah la soo gaaraan shacabka tabaaleysan ee ka soo barakacay guryahooda.

"Guddigaabaarahaheerka wasiir iyo maamulka Gobolka waxey qabteen howlo muhiim ah oo la'aantood aysan suurtogeli laheyn in howlahan muhiimka ah ee la qabtay ay noo qabsoomaan. 4tii usbuuc ee u danbeysey waxaan aragnay sida caalamku uu diyaarka ugu yahay inuu shacabka soomaaliyeed la soo gaaro gurmadi. Waxaan aan arrimaha abaaraha kala hadlay qaar ka mid ah madaxda adduunka, Madaxa Guud ee Hay'ada Cuntada Adduunka, iyo Qaramada Midoobay oo aan dhammaantood ku xoojiyey sida loogu baahanyahay in gurmadi uu si dhaqsi leh u soo gaaro shacabka soomaaliyeed.

"Aad iyo baan ugu faraxsanahay niyadda wanaagsan ee caalamka, ha yeeshiexxaaladda hadda jirta waa mid aan u baahneyn in gar-gaarka lala soo daaho. Sidaas daraadeed, waxaan markale u diraya caalamka baaq ah in gurmadi deg-deg ah lala soo gaaro shacabka soomaaliyeed".

Ra'iisul Wasaaraha ayaa u mahadceliyey guddigaabaaraha Qaranka, Maamulka Gobolka, Dowlahada Qatar, Isu-tagga Imaaraadka Carabta (UAE) iyo Kuwait, shacabka soomaaliyeed iyo dhammaan hay'adaha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah sida Qatar Charity, waxaanuu ku dhiiri geliyey in la sii dar-dar geliyo howlaha muhiimka ah ee ay wadaan. Sidoo kale waxuu baaq gaar ah u direy Qurbo-joogta Soomaaliyeed iyo ganacsatada si ay kaalin mug leh uga qaataan gurmadi abaaraha oo ay si toos ah ula soo xiriiraan guddigaabaaraha ee Dowladda.

- DHAMAAD -

